Kiimoteraabiga Kansarka (Cancer Chemotherapy)



Jidhkaagu waxa uu ka sameysan yahay balaayiin unugyo ah, taasoo marka lagu eego weyneyaha, u ekaan kara sidatan.

Unugyada caadiga ah wey noolaadaan, koraan, dhintaan, waxana sameysma unugyo cusub.

Unugyada kansarku ma aha kuwo caafimaad qaba. Waxay koraan marka aan loo baahnayn. Waxayna ku sameysmaan si aan xad lahayn.

Kiimoteraabi waa daaweyn dawo iyadu burburin karta unugyadaas oo ka joojin karta inay bataan.

Hase yeeshee, waxa kale oo ay waxyeeleyn kartaa unugyada caafimaadka qaba. Tani waxay keeni kartaa cilado soo kordha.

Badanaa unugyada caafimaadka qaba wey soo kabtaan ka dib kiimoteraabi.

Mudada ey kuu socoto kiimoteraabiga waxa dhici karta in aadan yeelan cilado soo kordha, ama aad yeelatid in yar, ama in badan.

Noocyada iyo xoogga ciladaha soo korodha ee aad yeelatid waxay ku xidhan tahay nooca iyo inta kiimoteraabiga ee aad qaadatid.

Ciladaha soo korodha way kala duwan yihiin, laakiin kuwa ugu badan waa lallabo ama yalaalugo, matag, daal, xanuun iyo lumis timo.

Waxa jira daweyno badan oo kaa gargaari kara ciladaha soo kordha.

Badanaa unugyada caafimaad qaba way soo kabtaan ka dib kiimoteraabiga, sidaa daraadeed badi ciladaha soo kordha si tartiib ah ayay iskaga tagaan.

Timaha luma inta lagu jiro kiimoteraabiga dib ayay u soo bixi doonaan.

Habka daweyntaadu waxay ku xiran tahay nooca kansarka, dawooyinka kiimoteraabiga ee la isticmaalay,ujee dada/ hadafka daweynta iyo sida jidhkaagu uga jawaabo. Waxa laga yaabaa in daweyn lagu siiyo maalin kasta, todobaad kasta ama bil kasta.

Waxa laga yaabaa inaad heso waqti nasasho ee u dhaxeeyaa daaweyntaada si jidhkaagu u helo fursad uu ku dhiso unugyo cusub oo caafimaad qaba.

Waxa laga yaabaa inaad dawooyinka ka qaadatid afka, u qaadatid duris ahaan ama faleebo/sayloon ahaan.

Dhakhtarkaaga ayaa dooran doona dawooyinka kiimoteraabiga iyo jadwalka daweynta ee adiga kuugu fiican.

Weydii dhakhtarkaaga haddii aad qabtid wax su'aalo ah.

A project by Health Roads Media and EthnoMed
This project has been funded in whole or in part with Federal funds from the Department of Health and Human Services, National Institutes of Health, National Library of Medicine, under Contract No. HHS-N-276-2011-0008-C with the University of Washington. Thank you to Safeway Foundation for its support to Harborview Medical Center's EthnoMed for the development of cancer-related content.